

Hagidda kala soocidda



Warbixin ku socota qoysaska oo ku saabsan sida loo
maareyo qashinka iyo kala soocidiisa.

Poseidonka cagaaran

Yoolkeenu waan inaan sida ugu macquulsan ugu jilcino dadka guryaha inaga deggan siday qashinka ugu tuuri lahaayen si bey,adda u fiican.

Mid kamid ah tilaabooyinka shaqo waa warbixintan ku saabsan meesha aad qashinka noocyadiisa kala duwan ku tuuri lahayd.

Waxaa aad muhiim u ah in qashinka khatarta ah, tusaale ahaan battariga iyo qashinka korontada ah aan lagu ridin bacda qashinka caadiga ah, arag bogga 14.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in tusaale ahaa baakadaha birta ka samaysan, baakada caagaga ka samaysan iyo wargeysyada la isku sooco si hadhow dib loogu isticmaalo.

Sida sharcigu dhigayo waa khasab in qashinka khatarta ah, baakadaha iyo wargeysyada laga sooco qashinka caadiga ah.

Bey,add qaabilsane ‘Miljövärden’

Qofka bey,adda qaabilsan baa kaga jawaabaya suaalaha ku saabsan qashinka. Nawaaxiyada qaarkood malaha qof bey,adda qaabilsan, markaa waxaad aadi kartaa qof guriga xanaanadiisa qaabilsan ‘husvärden’. Telefoonlambarka waxaad ka helaysaa jaranjarta.

Guri bey,aded ama qol bey,aded ama nidaam kale?

Qaar badan oo kamid ah dadka guryaha naga deggan waxay haystaan guri bey,aded ama qol bey,aded halkaas oo lagu kala sooci karo wargeysyada, baakadaha, nalalka, nalalka dhaadheer, battariyada, qashinka cuntada iyo qashinka soo hareenka ah.

Haddii aadan haysan guri bey,aded ama qol bey,aded oo si buuxda wax loogu kala sooci karo waxaa jira kara fursad kale oo aad qashinka ku kala sooci kartid tusaale ahaan qol qashinka lagu tuuro. Haddii kale wargeysyada, baakadaha iyo battariyada waxaa lagu tuuraa meesha loogu talogaley qashinka dib loo isticmaalo ‘återvinningsplats’. Meesha aad qashinka soo hareenka ah iyo qashinka cuntada ku tuureysid waxay ku xiran tahay hadba nawaaxiga aad deggan tahay, la hadal qofka bey,adda qaabilsan ama qofka xananada guriga qaabilsan.

Warbixin ku saabsan meelaha qashinka dib loo isticmaalo loogu talogaley waxaad ka helaysaa www.goteborg.se. Waxaad sidoo kale wici kartaa xarunta adeega macaamiisha ee wareega alaabaha iyo biyaha.
Telefoon: 031-368 27 00

Waxaad keentid meesha qashinka dib loo isticmaalo waxaa laga samaynayaa alaabo cusub



Soo hareenka cuntada waxaa laga sameyaa gaaska dabiicigaa



Baakadaha macdanta ka samaysan waxaa laga sameyaa



Baakadaha caagaga ka sameysan waxaa laga sameyaa



Baakadaha ka samaysa kartoona iyo waraaqaha waxaa laga sameyaa



Wargeysyada iyo waraaqaha wax lagu daabaco waxaa laga sameyaa



Dhalooyinka kalarka leh waxaa laga sameyaa



Dhalooyinka aan kalarka lahayn waxaa laga sameyaa



Photo: FTI.



Qashinka cuntada

Nawaaxiyada u badan waxaan ku leenahay meelo lagu aruuriyo qashinka cuntada ka harey. La hadal qofka bey, adda qaabilsan ama qofka xanaanada guriga qaabilsan haddii aad qabtid suaalo ku saabsan aruurinta qashinka cuntada ka harey.







- Soo hareenka cuntada, mid ceeriin iyo mid la kariyey
- Qudrad- iyo soo hareenka qudaarta cagaaran
- Ukun (xataa qolofa)
- Roodhi
- Xashka kafeyga, shaandhada kafeyga
- Caleenta shaaha iyo caleenta shaaha ee bacaysan
- Caanshiyaha lagu tirtirto iyo kuwa la isku qalajiyo
- Ubaxyada la tuurayo



- Tubaako, haashka cigaarka iyo tubaakada daanka
- Xafaayadaha iyo baandheysyada
- Maryo
- Waxa ku jira kiishka huufarka
- Ciida bisada iyo hashka ka hara alwaaxyada la xogo
- Ciid, carro, dhooqo iyo quruurux
- Dhuxusha wax lagu dubto iyo dambaska

Sidaan baad ugu guuleysan kartaa bacda bunniga ah

Qashinka cuntada waa hanti muhiim ah. Sidaas darteed waa in la kala sooco oo lagu soo gudbiyo bacda bunniga ah. Qashinka cuntada ka harey ee lasoo uruuriyo waxaa la geeyaa xarun lagu beddelo waxaana loo isticmaalaa in laga sameeyo gaas dabiici ah oo loogu talogaley gaadiidka iyo digo beereed dabiici ah oo nafaqo leh.





Qashinka soo hareenka ah

Waxa soo hara markaad qashinka kala soocdid waxa loogu wacaa soo hareen waxaana lagu guraa bacda qashinka. Qashinkaa waa la gubaa tamartiisana waxaa loo isticmaalaa kuleylin iyo koronto.



Waxa soo hara markaad qashinka kala soocdid, tusaale ahaan:

- Dharka dhamaadey
- Xafaayada iyo shaafada qoyan
- Dhalooyin tiro yar iyo wixii dhoobo ka samaysan oo si fiican loo duuduubay
- Burska weelka lagu dhaqo iyo istraashada
- Kiishka huufarka



- Bushqad iyo calaamadaha la dhajin karo
- Soo hareenka cuntada
- Qashinka khatarta ah
- Baakadaha
- Wargeysyo
- Dharka la isticmaali karo
- Battariga
- Dawooyin, cirbado la isku duro
- Koronto- qashinka korontadada

Sidaan ku samee cuntada subaga leh ama saliida leh

Haddii subaga ama saliida cuntada ay ku dhacdo dhuunta biyaha waskhda ah qaada way adkaanasaa weyna guntamaysaa. Guntama-haas waxay keeni karaan inay biyuhu istaagaan ama guriga biyo qaadaan ama qasitaan ku yimaado nadiifinta biyaha, sidaas darteed waa inaad waligaa ku tuurin subag ama saliid waastada weelka.

SUBAG



SALIID





Baakadaha macdanta ka samaysan

Baakadaha macdanta ka samaysan waa in la geeyo guri bey,aded iyo qol bey,aded ama meelaha qashinka dib loo isticmaalo lagu tuuro.



Photo: FTL



Halkaan waxaa ku tuureysaa tusaale ahaan:

- Qasacadaha wax lagu dhigto
- Aluminiumka
- Tuyuubka lagu shubo maraqa ugxanta kaluunka
- Aabur iyo furka quraaradda
- Shumac
- Qasacadaha maran oo kalar/ koolo horey ugu jireenn
- Qasacadaha maran oo horey wax buufsama ugu jireen



- Qasacadaha ay ku jiraan kalar iyo koolo
- Qasacadaha ay ku jiraan wax la buufiyo



Baakadaha caaga ka samaysan

Baakadaha caaga ka samaysan waa in la geeyaa guri bey,aded iyo qol bey,aded ama meelaha loogu talogaley qashinka dib loo isticmaalo.



Photo: FTI.



Halkaan waxaad dhigaysaa tusaale

- Bacaha balastiiga ah
- Baakadaha jilicsan ee balastiiga ah
- Suufka waxyaalaha cusub la socda
- Bacaha jibska
- Dhalada tamadhada ridqan [ketchup]
- Caaga shaambada
- Sanduuqa dhalada ah



- Alaabta ciyaarta caruurta ee caaga ah
- Burshka weelka
- Cadeey burush
- Galka cd-ga
- Bahalka ubaxa la dhexdigo



Baakadaha ka samaysan kartoona iyo waraaqaha jaldiga adag leh

Baakadaha ka samaysan kartoona iyo waraaqaha jaldiga adag leh waxaa la geeyaa guri bey,aded iyo qol bey,aded ama meelaha qashinka dib loo isticmaalo loogu talogaley.



Photo: FTI



Halkaan waxaad dhigaysaa tusaale ahaan:

- Baakadka caanaha, baakadka juuska
- Baakadka baastada
- Kartoona saabuunta dharka
- Jaldiga adag ee waraaqaha/suufka musqusha
- Waraaqaha/kartoona lagu duubo hadi,yadaha
- Warqad jaldi adag
- Bacda burka iyo sonkorta
- Kiish dhusha waraaq ka ah



- Wargeysyada
- Waraaqaha warbixinadaa
- Waraaqaha wax lagu qoro
- Bushqad



Wargeysyada iyo waraaqaha daabacaada

Wargeysyada waxaa la geeyaa guri bey,aded iyo qol bey,aded loogu talogaley ama meesha qashinka dib loo isticmaalo loogu talogaley alaabaha.



Photo: FTI.



Halkaan waxaad dhigaysaa:

- Wargeysyada maalin lahaa
- Wargeysyada wiig lahaa
- Kataloogyada
- xayeysiinta
- Waraaqaha warbixinta ah
- Waraaqaha wax lagu qoro



- Bushqada
- Waraaqaha dhegga
- Waraaqaha balastiiga ah
- Bacaha balastiiga ah



Dhalooyinka kalarka leh iyo kuwa aan kalarka lahayn

Baakadaha ka samaysan dhalada waxaa la geeyaa guri bey,adedka iyo qol bey,adedka ama meesha qashinka dib loo isticmaalo loogu talogaley.



Photo: FTI



Photo: FTI



Halkaan waxaad dhigaysaa tusaale ahaan:

- Dhalooyinka khamriga
- Dhalooyinka casiirka
- Dhalooyinka marmaladada



- Galaaska cabitaanka
- Alaabta dhoobada ah
- Alaabta dhoobada adag ah
- Dhalada muraayada daaqada
- Dhalada muraayada
- Nalka la shito

Dib u isticmaalid



Ha tuurin alaabo dhan ama nadiif ah. Nawaaxiyada qaarkood waxaan ku leenahay meelo alaabta dib loo isticmaalo loogu talogaley ama dukaan gacan labaad ah. Weydii qofka bey,adda qaabilsan ama qofka xanaanada guriga qaabilsan.

Waxaad sidoo kale geyn kartaa alaabahaga wali la isticmaali karo hey,adaha samafalka. Waxay leeyihiin sanduuq alaabaha ay ku aruuriyan oo loogu talogaley dharka iyo kabaha.

Hey,ado badan waxay sidoo kale qaabilaan fadhiga guriga ee la tuurayo. Bogga degmada waxaad ka helaysaa shan xarumood oo qashinka dib loo isticmaalo loogu talogaley halkaas oo aad fursad u haysatid inaad ugu deeqdid wax kasta lagasoo bilaabo fadhi guri ilaa iyo dhar. Xarunta wareega alaabta ee kretsloppsparken Alelyckan waxna waad ugu deeqi kartaa huudheynta waad kasoo gadan kartaa.


Qashinka culus




Qashinka culus waa qashinka waa waaweyn ee guriga ka yimid sida tusaale ahaan geedka ciid miilaadiga masiixiga loo sharaxo, fadhiyada jijabay iyo baaskiilka laakin maahan qashinka korontada ah.

Haddii aad rabtid inaad tuurtid alaabo waaweyn oo jijaban weydii qofka bey,adda qaabilsan ama qofka xanaanada guriga qaabilsan oo weydii waxa nawaaxiga laga oggolyahay.

Qashinka khatarta ah waa in la




Qashinka waaweyn ee korontada ah waa tusaale ahaan tv-yada, kombiyuutarada, offinka mikrowga, qalabka sameecadaha. **Qashinka meel dhexaadka ah ee korontada** waa tusaale ahaan mashiinka kafeyga lagu karsado, mashiinka wax lagu dalooliyo, fooneeye, mashiinka wax lagu qaso. **Qashinka korontada ee yaryar** waa tusaale ahaan qalabka lagu xiirto, telefoonada gacanta, filooyinka.




Iftiin soo saarayaasha waa tusaale ahaan nalalka ifa, nalalka tamarta yar leh ama nalalka dhaadheer. Ka taxaddar nalalka si aysan u burburin.



Battariga yaryar waa battariga caadiga ah iyo battariga batoonka ah.



Madooyinka kiimikadaa waa tusaale ahaan, maadedda tiinarka, burushka rinjiga, kolorin, madooyinka timaha lagu kalareeyo, kalar, rinjiga cidiyaha la mariyo, koolo, saliid daadatey, qascadaha kalarka oo wax ku jiraan. Curiyaha meerkuriga waa in lasoo aruuriyo oo laga taxaddaro.



FARMASHIYAHA

Dawooyinka waa dhamaan nooc kasta oo dawo ah sida kaniiniyada, kaniiniga ka hortagga uurka, shoroobada, jeermis dhishada, boomaatooyin. Dawooyinka iyo cirbada faleembada la raaciyo waxaa loo celiyaa pharmashiyaha.



Meelaha lagu aruuriyo qashinka korontada ah iyo qashinka kale ee khatarta ah

Nalalka, Nalalka dhaadheer iyo battariga waxaad geyn kartaa qol bey,aded ama guri bey,aded haddii aad heli kartid. Haddii kale waxaa jiri kara fursado kale oo aad kusoo gudbin kartid noocyadan qashinka ah. Waxaa sidoo jiri kara meelo agagaarkaga ah oo qashinka korontada ah lagu aruuriyo. Weydii qofka kuu qaabilsan bey,ada ama qofka xanaanada guriga qaabilsan.

Meelaha lagu aruuriyo	Halkaan waxaad keeni kartaa
Xarumaha loogu talogaley qashinka dib loo isticmaalo 'återvinnings-centraler' (Tagane, Sävenås, Bulycke, Högsbo, Alelycka).	Qashinka korontada, battariga gaariga, waxyaalaha iftiinka keena, kiimikooyin iwm.
Xarumaha bey,aded 'miljöstationer' Waxay ku yaaliin xarumaha kaaliimaha shidaalka qaarkood.	Battariga gaariga, Battariga yaryar, waxyaalaha iftiinka keena, kiimikooyin.
Gaariga lagu aruuriyo qashinka khatarta ah wuxuu marayaa 'farligt-avfall bilen' magaalada Göteborg oo dhan xilliyada guga 'vår' iyo dayrta 'höst'.	Qashinka yaryar iyo kan meel dhexaadka ah,battariga gaariga, waxyaalaha iftiinka keena, kiimikooyin.
Dukaamada qalabka elektorooniga qaarkood, Arag liiska www.elektronikatervanning.com	Dhamaan qashinka korontada.
Qasnado qashin aruurin 'samlare' oo dukaamada qaarkood yaal.	Qashinka yaryar, battariga yaryar, qasacyada wax la buufiyo ku jiraan, waxyaalaha iftiinka keena.

Warbixin ku saabsan meelaha degmadu qashinka ku aruuriso waxaad ka helayaas www.goteborg.se. Xarunta adeega macaamiisha waareega alaabta iyo biyaha 'Kretslopp och vatten', telefoon 031-368 27 00, warbixinada ku saabsan aruurinta qashinka korontada iyo wixii kale oo qashinka khatarta ah, xilliyadda ay furan yihiin xarumaha qashinka dib loo isticmaalo loogu talogaley iwm.

Waad ku mahadsan
tahay kala soocidada iyo waxaa
u qabatey bey,adda.



Göteborgs Stad
Kretslopp och vatten

www.goteborg.se



www.poseidon.goteborg.se

Warbixintan waxaa si wadajir ah uga wada shaqeeyey Bostads AB Poseidon iyo Kretslopp och vatten.

Turjumida waxaa sameeyey Bostads AB Poseidon.